

Qaadista saamiga baaritaanka Korona oo si fudud lagu helayo.

Haddii aad naftaada ama cunuggaada uga shakiso cudurka fayruska Korona, waxaad qiimeynta astaamaha cudurka ka sameynta kartaa adeegga Omaolo (omaolo.fi). Waxaad wakhti baaritaan ka qabsan kartaa ama aad talo weydiin kartaa rugta talabixinta Korona, tel. 09 310 10024 (maalmaha shaqada, saacadda 7-20) wakhtiyada kalana Caawimaadda heeganka, tel. 116 117 Suurragal ma ahan in adeegga Omaolo qof kale arrintiisa lagu xalliyo, yacni wakhti baaritaan cunugga loogama qaban karo.

Astaamaha fayruska Korona lagu yaqaan waa xummad, qufac, dhuun xanuun, hargab, neefta oo adkaata iyo dareenka urta ama dhadhanka oo luma.

Si qaadista cudurka looga hortago, waxaa muhiim ah in haddii qof qoyska ka tirsan uu qabo calaamadahan uusan ardaygu aadin dugsiga kahor inta baaritaanka Korona laga sameynayo natiijadana laga ogaanayo.

Dhammaan dadka reer Helsinki ee qaba calaamadaha habdhiska neefmareenka iyo bukaannada u baahan qiimeynta dhakhtarka waxaa lagu hagayaa in ay aadaan rugaha caafimaadka Korona ee Laakso ama Malmi. Rugaha kale ee caafimaadka laguma daaweynayo bukaannada qaba calaamadaha habdhiska neefmareenka.

Todobaadyadi la soo dhaafay waxaa yaraaday dadka qaadaya cudurka ee Helsinki jooga. Arrimaha Korona ee hadda jira waxaad kala socon kartaa cinwaanka www.hel.fi/koronavirus.